IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Mogadiscio, 27 Agoosto 1975 | L. 3 R. 8

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 48 17 Agosto 1975 — *Mideynta Guddiyada Siyaasadda iyo Bulshada* — *Bog. 598*

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 17 Agosto 1975, L. 119 — *Magacaabid* » 599

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 17 Agosto 1975, L. 120 — *Dhisid Gobolka Jubada Dhexe* » 601

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Madbacada Dawladda — Muqdisho

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 48

Tr. 17 Agosto 1975
Mideynta Guddiyada Siyaasadda iyo Bulshada

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go' aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigooda ahaa 17 Agosto 1975.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Guddiga Siyaasadda iyo Guddiga Bulshada ee lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay 1 taariikhdiisuna tahay 6 disember 1974 waa la mideeyey oo waxaa hadda iyo wixii ka dambeeya loo aqoonsandoonaa Guddiga Siyaasadda yo Bulshada.

Qod. 2aad

Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada oo ku xusan qod. 1aad ee Sharcigan wuxuu lahaan doonaa awooda iyo howlaha loo xilsaaray labadii Guddi ee hore ee Siyaasadda iyo Bulshada, sida ay qoraayaan qodobadda 4aad iyo kan 5aad ee sharciga lamb. 1 taariikh 6 Dishembar 1974.

Qod. 3aad

Waxyaabaha ee aan sharcigan lagu beddelin sidoodii hore ayay ahaan doonaan.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.
Muqdishu, 17 Agosto 1975

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr.17 Agosto 1975. L. 119**
**Magacaabid.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 1 taarikh 6 dishembre 1974 iyo sharciga ka dambeeyay taarikhdiisu ahayd 17 aqosto 1975 kuna saabsanaa Guddiyada G.S.K.

ISAGOO ARKAY Qod. 1aad iy. kan 3aad ee Sharciga lamb.1 taarikh 6 dishembre 1974 iyo qod 3aad, ee Sharciga taarikhdiisu tahay 17 agosto 1975;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go aanka Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Guddiyada lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay 1 taarikhdiisuna tahay 6 dishembre 1974 iyo beddelaadii ka dambeeyay, waxay ka koobnaan doonaan Jaalleyaasha hoos ku magacaaban:

GUDDIGA SIYAASADDA IYO BULSHADA

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| — | Jaalle G.-Sare | Ismaaciil Cali Abokor | — | Guddomiye |
| — | Jaalle G.-Sare | Cali Mattan Xaashi | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Dhexe | Cabdirazaag Moxamed Abukar | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Sare | Axmed Moxamed Faarax | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Sare | Faarax Wacays Duule | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Dhexe | Cabdulqadir Xaaji Moxamed | — | Xubin |

GUDDIGA DHAQAALAHA

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| — | Jaalle S.-Gaas | Xussen Kulmiye Afrax | — | Guddomiye |
| — | Jaalle G.-Sare | Moxamed Cali Shire | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Sare | Muusa Rabile Good | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Dhexe | Cusmaan Moxamed Jeelle | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Sare | Axmed Xasan Muuse | — | Xubin |

GUDDIGA CADAALADDA IYO SHARCIGA

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| — | Jaalle G.-Sare | Moxamed Sheekh Cusmaan | — | Guddomiye |
| — | Jaalle G.-Dhexe | Moxamed Cumar Jees | — | Xubin |
| — | Jaalle G.-Dhexe | Cabdi Warsama Isaaq | — | Xubin |

2. Wax iska ma beddelin xubnaha GUDDIGA NABADGELYADA G.S.K. oo lagu magacaabay Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamb. 1 ee 6 Dishembar 1974.

Qod. 2

1. Jaalle G. Sare Maxamed Sheekh Cusmaan oo lagu magacaabay xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamb. 1 ee 6 dishembar 1974 "Kaaliyaha Madaxwynaha" wuxuu isla mar ahaantii hayn doonaa jagada Kaaliyaha Madaxweynaha.

2. Jaalle G. Dhexe Cabdi Warsame Isaaq oo hadda ka hor l. xilsaaray maamula arrimaha shaqaaalaha ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu sii wadi doonaa howshaas iyada ah.

Qod 3aad

Waxyaabaha ee aan lagu soo beddelin Xeerkan, sidoodii hore ayay ahaan doonaan.

Qod 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galaayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdishu, 17 Agosto 1975.

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S Gaas Moxamed Siyaad Barre*

XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA.

Tr. 17 Agosto 1975. L.120.
Dhisid Gobolka Jubada Dhexe

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 52 ee 8dii Juniyo 1972 oo ku saabsanaa Maamulka Dowladaha Hoose;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay laga maarmaan in la dhiso Gobol cusub sii loo daryeelo horumarka dhaqaalaha iyo bulshada Ummada Soomaaliyeed ee degmooyinkaas la dejiyay;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka oo fadhigooda ahaa taarikh: 17 agosto 1975

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisay Gobol cusub oo lagu magacaabay loona aqoonsandoono GOBOLKA JUBADA DHEXE oo magaalo madaxdiisu noqon doonto DUJUMA.

Qod. 2

Gobolka Jubada Dhexe, wuxuu ka koobmi doonaa Degmooyinka hoos ku magacaaban:

— Degmada Dujuma.
— Degmada Jilib.
— Degmada Baardhera.
— Degmada Saakow.

Qod. 3

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Mugdshu, 17 agoosto 1975

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*